

**Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare Kacaanka**

**10 Maajo 1971, lamba. 133.**

**Abuuridda Maxkamadda Ciidamada Hargeysa.**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Warqadda koowaad ee Kacaanka,  
Marka uu arkay Xeerka lamba. 1 ee 21 Oktoobar 1969;  
Marka uu arkay qod. 1aad faqradda 2aad wax ka baddalka lagu sameeyay Xeerka  
Nidaamka Garsoorka Ciidamada Xeerka 8 Abriil 1970, lamba. 20;  
Marka uu garowsaday baahida lo qabo in la aburo Maxkamad Ciidan oo xarunteedu  
tahay Hargeysa;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA**

**Qod. 1**

Waxaa la abuuray Maxkamad Ciidan oo xarunteedu tahay Hargeysa si ay u qabato  
maamulka garsoorka ciqaabta Ciidamada iyadoo ka garsooraysa qod. 2 Xeerka Ciqaabta  
Ciidamada waqtiga Nabadda iyo wixii garsoor kale oo xeerku jidaynayo.

**Qod. 2**

Maxkamadda Ciidamada ee ku xusan qod.1 ikhtisaaskeeda dhuleed waa Gobollada  
Waqooyi Galbeed iyo Bari.

**Qod. 3**

Maxkamada Sare Ciidamada marka uu codsado Xeer Ilaaliyaha Ciidamada, eedaysanaha  
ama xaafiis ahaan waxay loo wareejin karaa Maxkamad Ciidan, una wareejin karta mid kale  
iyadoo aan loo eegayn ikhtisaaska dhuleed.

**Qod. 4**

Xeerkaan wuxuu dhaqangalaya taariikhda lagu faafiyo Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 10 Maajo 1971.

Guddoomiyaha  
Golaha Sare Kacaanka  
**S. Gaas Maxamed Siyaad Barre**